

3+ Review

Somali translation of 3+ Review



Waalidka Qaaliga ah

Dhammaan carruurta ku jirta dugsiga xannaanada ayaa loogu baaqayaa dib u eegista caafimaadka oo uu sameeyo booqdaha caafimaadka (health visitor) ee dugsiga soo booqda.

Waxay tani waqtii muhiim ah u tahay nolosha ilmahaaga. Waxaa muhiim ah inuu ilmahaagu barto in uu kalsooni yeesho, wax aamini karo, wax baar baaro oo uu awodo in uu xiriirro dhistro uuna waxbarasho qaato.

Dhawaan adiga iyo ilmahaaga ayaa la idinka marti qaadi doonaa kulan aad la yeelataan booqdaha caafimaadka si aad horumarka ilmahaaga uga wada hadashaan.

Waxaa aad muhiim u ah in uu ilmahaagu xiiseeyo waxbarashada. Waxuu kulankani adiga fursad kuu siin doonaa in aad ka hadasho horumarka bulsheed iyo shucuureed ee ilmahaaga. Hadba sida ay u badan tahay aqoonta aad ka haysato caafimaadka iyo horumarka ilmahaaga ayay u fududdahay in aad isaga caawiso.

Haddii uu ilmahaagu iminkaba taageero ka helo adeegyo caafimaad iyo waxbarasho oo kaladuwaa wuxaan haddana ku dhiirrigelin lahayn in uu ka qayb galo Dib u eegista 3+ (3+ Review).



Maamulaha/hoggaamiyaha dugsigaaga xannaanada ayaa macluumaad kaa siin doona sida aad ballan ugu dhigan karto Dib u eegista 3+ taasoo aad la yeelato booqdaha caafimaadka. Haddii aad turjumaan u baahan tahay fadlan noo soo sheeg maxaa yeelay tani waa wax u baahan in hore loo sii diyaariyo.

- Waxaa tan lagu qaban doonaa dugsigaaga xannaanada.
- Fadlan soo qaado buugga cas (red book) ee ilmahaaga (PCHR).

Barnaamijka Early Intervention Transformation Programme (EITP) (Barnaamijka Beddelaadda Dhiegalka Hore) waa barnaamijka Northern Ireland Executive (Fulinta Waqooyiga Ayrland) / Atlantic Philanthropies (Deeq-bixinada Atlaantigga) ee Delivering Social Change Signature Programme (Barnaamijka Astaanta u ah Fulinta Isbeddelka Bulsheed), oo ay wadajir u maalgeliyeen sanduuqa Delivering Social Change (Fulinta Isbeddelka Bulsheed), DoH (Wasaaradda Caafimaadka), DE (Wasaaradda Waxbarashada), DoJ (Wasaaradda Caddaaladda), DfC (Wasaaradda Bulshooyinka), DfE (Wasaaradda Dhaqaalaha) iyo The Atlantic Philanthropies (Deeq-bixinada Atlaantigga).

**Barnaamijka EITP waxay ujeeddadiisu
tahay in uu natijjooyinka u wanaajiyo
carruurta iyo dhallinyarada ku
kala baahsan Waqooyiga Ayrland
isagoo dhisa xeelado dhexgal
hore.**

